

## **Tallaabooyin looga hor-tagaya Caabuqa Coronavirus**

### **War-gelin ku socta dadka degaanka ah iyo Hooyga ay deggan yihiin Qaxootiga**

Faafitaanka xawaaraha leh ee Coronavirus (SARS-CoV-2) waa mid walaac leh.

Waddamo badan ayuu dhibaateeyay Caabuqa, iyadoo Jarmalkana ay tiradu si weyn u korortay.

Tallaabooyin in la qaado ayaa loo baahday si loo hor-istaago in Fayruska uu ku sii faafo Jarmalka.

Caafimaadka qof kasta waa in la ilaaliyaa. Xanuunku wuxuu yeelan karaa cawaaqib xun, wuxuuna sababi karaa dhimasho. Qaxootiga iyo muhaajiriinta ayuu sidoo kale saameynayaa.

Waxaan kaliya Fayruska ka guuleysan karnaa haddii qof kasta uu hab-dhaqankiisa shaqsiyeed uu uga qeyb-qaato oo uu raaco tallaabooyinka la bixiyay.

#### ***Fadlan raac hab-raacyada soo socda oo ka taxaddar dadka kuu dhow:***

- **Ka fogow xiriirka ama taabashada dadka kale** marka laga reebo dadka kuu dhow ee aad guriga ku wada nooshihiin
- **Iska joog Gurigaaga.** Hooygaaga uga soo bax kaliya waxyaabo lagama maarmaan ah oo deg-deg ah.
- **Masaafu ugu yaraan 1,5 ah u jirso dadka kale** ee hooyga Qaxootiga kugula nool iyo sidoo kale goobaha furan ee dadweynaha.
- Joogista waddooyinka, jidadka iyo barxadaha waa la mamnuucay, kaliya waxaa la oggol-yahay qof kaligiis socda ama ay la socdaan dad hal-meel/hal-guri kula nool.
- **Xafladaha u dib-dhigo wakhti kale.** Dadka koox ahaanta ugu xafladeeya barxadaha dadweynaha, guryaha iyo meelaha gaarka ah waa la mamnuucay.
- **Kulamada Kaniisadaha, Masaajidda, Macbadyada Yahuudda iyo goobaha bulshooyinka diimaha kale heysta waa la mamnuucay.**

**Hab-raacyadan xaddidaya, xiriirka dadka kale waxay muhiim u yihiin in cudurka iyo faafista Coronavirus-kan qatarta ah la xakameeyo. Sidaas darteed ganaax ayaad ku muteysaneysaa jebinta hab-raacyadan.**

Xarumahan iyo adeegyada soo socda way xirnaanayaan illaa amar dambe:

- Goobaha cuntada bisil, sida Maqaayadaha, Baararka Kafateeriyada iyo goobaha lagu cabo qamriga,

- Shirkadaha adeega ee qeybta daryeelka shaqsiyeed sida timo-jareyaasha iyo goobaha is-qurxinta, Masaajada, meelaha laysku shabbeeyo (Tattoo-ga)
- Dukaamada Dharka iyo Kabaha
- Garoomada Isbooritga, Hoolalka Dabaasha
- Shaleemooyinka, Buug-akhriska, Xadiiqadaha Xeywaannada
- Goobaha Waxbarashada,
- Goobaha la-talinta,
- Gaabaha Carruurta ku ciyaaraan,
- Goobaha Sharmuutooyinka ,
- Goobaha la-talinta, sida La-talinta Muhaajiriinta, La-talinta dadka balwadda qabatimay, La-talinta Qilaafaadka Uurka.
- Xarumaha qoysaska, Guryaha Jiilalka kala duwan, Xarumaha Haweenka.

Taleefoon ama hab elektarooni ah in lagu helo Goobaha La-talinta waa suuragal.

**Xarumaha soo socda way furnaanayaan, waxaana la oggol-yahay kaliya xaaladaha deg-degga ah qof qof, taas lagama wado kooxo, in loo booqdo:**

- Quutul-daruuriga
- Dalabaadka la geeyo iyo Qaadashada cuntada guryaha lagu cuno
- Bangiyada
- Farmashiyeyaasha
- Goobaha dawada
- Baqaarrada qalabka caafimaadka
- Goobaha muraayadaha Indhaha
- Xarumaha qalabka maqalka caawiya
- Laamaha Deutsche Post AG iyo goobaha shixnadaha
- Dukaamada Joornaallada iyo Tubaakada

Taxaddar ahaan, fadlan sii ogow in goobta aad rabto ay furan tahay ka hor inta aadan aadin, si aad uga fogaato socod iyo kulamo laga maarmi karay. Raac tilmaamaha shaqaalaha wax iibiya.

***Isbitaallada, Goobaha dadka howlgabka ah iyo Baxnaanita ee taxaddarka goonida ah looga baahan yahay waxaa lagu soo rogay xayiraadaha soo socta:***

- Bukaannada ku jira Isbitaallada iyo Qeybaha waxaa maalintii loo oggol yahay kaliya booqashada hal qof. Tallaabooyin difaac iyo nadaafadeed waa lama huraan in la raaco.
- Dadka ka yar 16 sano iyo dadka neef-mareenka ka xanuunsan lama oggola in la soo booqdo.

**Fadlan gacan ka geeyso, Maxaa yeelay waxay ku xiran tahay caawinta qof kasta!**

Fadlan ka fogow inaad nala soo xiriirto xusuusnowna inaad si joogto ah gacmaha isaga dhaqdo.

Waa lagu soo wargelin doonaa marka ay noqoto in xannibaadaha laga maarmi karo.